



Xeerka Gudigga

4.30.040-P

Xuquuqda Ardayga ee La Xiriirta Baarida Qofka iyo Hantida

baaris walba.

Dugsiga Degmada ayaa siiso ardayda aagaga keydka, sida sanduuqyada, miisaska, iyo meelaha la midka ah iyo sidoo kale waxay siisaa ardayda tejnoolijiyada qaar, softaweerka, iyo helitaanka intarneetka (si wadajir ah, "Dhismaha Degmada"). Ardayda ma lahan rajada asturnaanta ee Dhismaha Dugsiga. Saraakiisha dugsiga waxaa loo ogolyahay inay baaraan Dhismaha Degmada ama hanti aan ardayga aheyn sida loogu baahdo iyo iyadoon jirin shaki macquul ah, ogolaanshaha ardayga/waalidka/masuulka, ama ogeysiinta. Waxaa sidoo kale loo ogolyahay inay baaraan sheyada aan la aqoonsan ee laga helay dhismaha PPS iyadoon jirin shaki macquul ah.

Ardayda iyo waaladiinta/masuulada waa in la soo ogeysiiyaa xeerka Degmada ee la xiriiro baarista iyo la wareegida alaabaha diyaarka loo heli karo, sida Buug yaraha Ardayga [insert link].

Ardayda iyo waalidiinta/masuulada ayaa sidoo kale la soo ogeysiinayaa habraacyada cabashada ee iyaga loo heli karo.

4. Ogeysiinta Waalidka/Masuulka

Waalidiinta/masuulada waa in sidoo kale la soo ogeysiiyaa oo waa inay ku bixiyaan ogolaansho ka hor inta aysan fullinta sharciga sameynin wareysiga ardayga ee ah



Xuquuqda Ardayga ee La Xiriirta Baarida Qofka iyo Hantida

kuwaasoo gacan ka geysanayo aqoonsashada, falanqeynta, oo kormeero kala duwanaanshaha.

6. Nidaamka

Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan nidaamka ee ay saraakiisha dugsiga laga yaabo inay sameeyaan baaris ama la wareegida ardayda ama hantidooda, nooca iyo noocyada hantida la mamnuucay, iyo sharaxaadaha kale ee ku saabsan hirgelinta xeerkaan, fadlan arag [Jiheynta Maamulka](#) quseeyo.

7. Qeexitaano

- a. **Shakiga macquulka ah** waa heerka cadeynta ku saleysan xaqiiqo gaar ah oo la qeexi karo, sidoo kale sida gabagabada macquulka ah ee laga soo saari karo xaqiiqooyinkaas. Tusaalooyinka shakiga macquulka ah waxaa ka mid noqon kara, laakiin aan ku xadidneyn, indha indheynta goobjoogayaasha ee shaqaalaha dugsiga; warbixinta ka timid ilaha loo arko kuwa lagu kalsoonyahay; urta la aqoonsan karo ee alkulada, tubaakada, ama xashiishka; ama dabeecad kaloo aan caadi aheyn.
- b. **Wareysiga fullinta sharciga** waxaa loola jeedaa su'aalo weydiinta ula kaca ah ee ardayga markii ardayga uu dareemo inuusan ka tagin qolka ama uu ka baxo wada hadalka. Ardayda raadineysa oo kala qeybgaleyso wada sheekeysiga fullinta sharciga inta lagu jiro xaalada maalinka dugsiga ma ahan wareysi.
- c. **Waalidka/Masuulka** waa qofka lagu aqoonsaday diiwaanada dugsiga sida inuu xiriir illaalin la leeyahay ardayga.
- d. **Qatarta dhow** waa qatarta degdeg ah oo dhaawaca halista ah ee jireed ama dhimashada ee shaqsiga ama dadka kale.
- e. **Qofka Baaritaanka** waa qofka dhaqankiisa dhalinayo shakiga in qofka laga yaabo inuu ka qeybgalay fal sharci daro ah.

Tixraacyada Sharciga: ORS 332.075; ORS 419B.010 - 419B.045; OAR 581-021-0050 illaa – 0075; ORS 332.107

Taariikhda: Waxaa la qaatay 8/27/73; La badalay 5/84; 10/25/84; 10/13/88; 10/25/90; 9/9/02; 7/14/2020